



Tacadiyada Jinsiga ee ka Dhanka ah Carruurta Somaliland

Dood ka Dhalatay Kulan Dadweyne Soona Bandhigtay Xalka Dhibaatan

4 February 2020

4 February 2020, saacaddu marka ay tahay 7:00 p.m (fiidnimo) Horn Cable TV ayaa baahin doona filim hal saac soconaya oo ku saabsan kulan dadweyne oo ay soo qaban-qaabisay Hay'adda Horizon 30 January 2020, kulan kan oo ka dhacay Hargeisa, laguna gorfeynayay dhibaataada aadka u daran ee tacadiyada jinsiga ee ka dhanka ah carruurta Somaliland.

Ujeedada kulankan dadweyne iyo kuwo kale oo mustaqbalka la qaban doonaa waa sidii fursad loo siin lahaa dadweynaha si ay uga hadlaan arrimaha si toos ah saameynta ugu leh naftooda, qoyskooda iyo bulshadooda. In kasta oo ay adagtahay ka hadalkeedu bulsho ahaan, balse dood togan oo xogogaal ku dhisan waxa ay bud-dhig u tahay in la helo xal waara iyada oo laga faa'iideysanayo khibrada iyo sida ay u arkaan arrintan dadka ay tooska u taabanayso.

Dooddii iyo gorfeyntii goobtaa ka dhacday waxa ay ahayd mid xogo muhiim oo wax ku ool ah la isku weydaarsaday wax-ku-oolna ah. Ka soo qaybqaateyaasha dhexdooda ayaa xogo muhiim ah is weydaarsanayey sidoo kale waxa ay doodda la wadaagayeen khubaradii goobta joogtay iyo daadihiyihii barnaamijka. Waxa ay ka hadleen sida dhibaataada kufsiga carruurta loo geystaa saameynta ugu leedahay bulshadooda, waxayna soo jeediyeen tallooyin dhiirran oo ku saabsan sidii Somaliland iyada oo midaysan ay uga hortegi lahayd cawaaqib xumada ka dhallan karta tacadiyada jinsiga ee ka dhanka ah carruurta. Waxa la isku raacay in kufsiga ka dhanka ah carruurta, kuwaas oo qaarkood da'doodu aad u yartahay, ee ka dhaca magaaloyinka iyo goobaha miyigaba aanay ahayn mid qarsoon. Qof kastaa waxa uu qiray in arrintan oo laga aamusnaadaa ay sii kordhinayso dhibaataada maskaxeed iyo jidheed ee soo gaadhaysa carruurta uu dhacday tacadiga kufsi kuwaas oo ay la dareemayaan qosaskoodu.

**Si aad xaqqi qada indhahaaga ugu aragtid, nala daawo barnaamijkan
kulanka dadweyne oo Horn Cable TV baahin doono 4 February
saacaddu marka ay tahay 7:00 pm (fiidnimo).**

6th Floor Omar Hashi Building, Hargeisa, Somaliland | +252 523 603 +252 (0) 633 751 063

P.O. Box 691-00621 Nairobi, Kenya | +254 (0) 20 4180 222 +254 (0) 713 773 420

www.thehorizoninstitute.org | info@thehorizoninstitute.org